VICTORIANombudsman

Warbixinta oo kooban – baaritaanka xiritaanka iyo sidii loola dhaqmay deganayaasha guryaha dadweynaha ee ka dhalatay COVID-19 'xiritaankii adkaa' ee Luulyo 2020.

Sababta aan u baarnay

1. Qiyaastii 4:00 galabnimo 4-tii Luulyo 2020, ku xigeenka Sarkaalka Sare Caafimaadka Victoria (Cudurada Laysqaadsiiyo) ('Ku xigeenka CHO') waxay soo saartay tilmaamaha caafimaadka dadweynaha ee deganayaasha iyo dadka kale ee ku yaal guryaha dhaadheer ee dadweynaha ee sagaalka ah ee xaafadaha gudaha Melbourne ee Flemington iyo North Melbourne.

2. Tilmaamahaan – wakhtiga, xanibaadaha ugu badnaa ee la saaray Australia ka jawaabida dilaacii COVID-19 – oo xirtay qiyaastii 3000 oo qof guryahooda 'xayiraad adag' oo degdeg ah.

3. Ombudsman ku wuxuu helay in ka badan 85 cabashooyin degenayaashaad, udoodayaasha bulshada iyo dadka reer Victoria ee saluugsan waxyaalaha la xiriira sidii loola dhaqmay dadka ku nool guryaha dhaadheer ee dadweynaha intii lagu jiray xayiraada.

4. Baarayaasha Ombudsman ka sidoo kale waxay yimaadeen gurhaya dhaadheer ee North Melbourne waxayna la hadleen kuwa u dooda bulshada, shaqaalaha adeegyada degdega ah iyo wakiilada Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Bani'aadamka ('DHHS') – mulkiilaha bulshada iyo hay'ada masuulka ka hawlgalka.

5. 16 ka Luulyo 2020, Ombudsman ku wuxuu go'aansaday inuu baaro sidii loola dhaqmay dadka intii lagu jiray xiritaankan, isagoo xoogga saaraya 33 Alfred Street, North Melbourne – guryaha dhaadheer ee dadweynaha oo hoos imaanaya xiritaankii ugu dheeraa.

6. Baaritaanku wuxuu eegay in saarida xiritaanka uu waafaqsan tahay *Xeerka 2006 ee Heshiiska Masuuliyada iyo Xuquuqda Bani'aadamka* (Vic), waxay sidoo kale tixgeliyeen:
   - shuruudaha waafaqsan ee dadka lagu xiray 33 Alfred Street
   - la hadalka rasmiga ah ee degenayaasha iyo kuwa u dooda
   - xinibaadaha dadku inay helaan hawo cusub, jimicsi, daryeel caafimaad iyo alaabta caafimaadka inay xirnaayeen.

7. Ombudsman ku wuxuu aqoonsaday natiijooyinka baaritaanka xiritaankan 33 Alfred Street waxay sidoo kale noqonayaan kuwa khuseeya guryaha dadweynaha ee kale ee Melbourne.

Waxaan helnay

Saarida xiritaanka

8. Dilaaca COVID-19 ee la xiriirta 33 Alfred Street waxaa la ogaaday markii koowaad 2dii Luulyo 2020, heerarkii hore ee 'hirkii labaad' caabuqa COVID-19 ee Victoria.

9. Dilaaca cudurkan ka hor, DHHS maysan diyaarin qorshe maamul oo khaas u ah dilaaca cudurka oo loogu talagalay guryaha dadweynaha ee Flemington iyo North Melbourne ee guryaha dadweynaha ee aad loogu badan yahay guud ahaan. Labadaba awaamiirta labadaba dawlada dhexe iyo Gobolada oo la xiriira ayaa lagu talinayaa nidaamka 'khatarta sare'iyo 'xasaasinimada' diyaarinta dukumiitigan.

10. Fiid dambe oo ah 3-da Luulyo 2020, ugu dhowaan laba dersin oo ah kaysaska dhowaan la xaqiijiyey ee COVID-19 waxay la xiriireen saddex guri oo dhaadheer oo ku yaal Flemington iyo North Melbourne.

11. Wada hadal, ka bacdi, kulan hay'adeed ayaa la qabtay 11: subaxnimo 4tii Luulyo 2020 si looga fekero jawaabta suurtagalka ah ee cudurkan dilaacay. Soo jeedintaan sida waafaqsan, dekenayaasha guryaha dhaadheer ee ay saameysay waxaa looga baahan doonaa inay guriga isku karantiimaan xilliga bilowga ah shan maalmood.

12. Saraakiil sarsare oo ka tirsan DHHS oo ka baxaya kulanka, oo ay ku jiraan Ku xigeenka CHO, ayaa filayey inaan nidaamkani uusan bilaaban doonin qiyaastii 36 saacadood.

13. Ka dib, intii lagu jiray galabtii hore ee 4ta Luulyo 2020, Ku xigeenka CHO waxaa lagu wargeliyey in go'aan la gaaray hore loogu soo dhigayo hawlgalka. Waa in la sameeyaa tilmaamo sida waafaqsan *Xeerka Fiyoobaanta iyo Caafimaadka Dadweynaha ee 2008* (Vic) wuxuuna bilaabanayaa isla galabtaas.

14. Go'aankani wuxuu u muuqday inay sameeyeen Golaha Wasiiradda ee Dhibaatada, Kulan wada hadal ah oo khaas ah ee Wasiiradda Dawlada Victoria oo uu gudoominayo Madaxa Dawlad Gobleedka.

15. Tani waxay ahayd isticmaalkii koowaad ee xaalad degdeg ah ee la isticmaalo awood xiritaan si loo maareeyo bulshada Victoria iyo 'xiritaankii adkaa'ee koowaad ee guryaha la degan yahay ee aadka loogu badan yahay meel kasta oo Australia ka mid ah iyadoo laga jawaabayo safmarkaan aduunka.

16. Sidaas oo ay tahay Ku xigeenka CHO waxaa la siiyey 15 daqiiqo oo kaliya inuu ka fekero saameynaha xuquuqaha bani'aadamka ee go'aanka ka hor intaan la qorsheyn xiritaanka in lagu dhawaaqo.

17. Iyadoo lagu qanacsan yahay baahida in la saaro xinibaadyo dheeraad oo ah caafimaadka dadweynaha ee goobaha cudurku ka dilaacay, Ku xigeenka CHO wuxuu yiri waxay door bidi lahayd fursad ay kula tashato hogaamiyayaasha bulshada dhaqamada badan iyo wakhti dheeraad ah oo ay kaga hadlaan fursadaha la helayo.

18. In kastoo ay saxiixday tilmaamaha, Ku xigeenka CHO wuxuu u sheegay baaritaanka kumay qanacsaneyn dib u dhigida xiritaanka maalin waxay sameyn lahayd 'kala duwanaan aad muhiim ah' kala duwanaan lagu xakameynayo cudurka dilaacay.

Dhaqangelinta

19. Kuwa qorsheynayey xiritaanku waxay u baahnaayeen inay si degdeg ah u sameeyaan una dhaqangeliyaan qorshe ay ku bixinayaan samafalka cunto, iyo sidoo kale mid caafimaad iyo taageero bulsho, ee kumanaanka qof ee laga yaabo inuu saameeyo soo dhexgalka.

20. Shaqaalaha dawlada iyo turjubaano xirfad leh ayaa loo baahday in la helo wakhti gaaban gudihiis. Kuwa ka shaqeynaya dhulka waxay u baahnaayeen tallo ku saabsan ka hortaga caabuqa oo ku haboon iyo baratakoolada kontoroolka. Wakhtigaas inta lagu jiro, waxaa jiray baahi lagu horumarinayo istiraatijiyada hawlgalka ee bulshada iyo wax u sheegida hogaamiyayaasha bulshada dhaqamada badan wax ku saabsan soo dhexgalka.

21. Ka sokow da'daalka ay u hureen kuwaas xiriirinaya hawlgalkaan, arimahan badidoodu waxay baaqi ku ahaayeen kuwa aan la sameyn ama hadda la sameynayo oo kaliya markii xiritaanku uu bilowday.

Sida loola dhaqmay dadka 33 Alfred Street

Ogeysiiska xiritaanka iyo ilaalinaha

22. Nuqulada Tilmaamaha Xiritaanka – qalabka luuqada Ingiriiska- oo dejinaya ujeedooyinka iyo shuruudaha hoos imanaya dadka la xanibay – lama qaybin markii xiritaanku uu bilowday. DHHS may siin qaar ka mid ah guryaha nuqulka dukumiintigan ilaa iyo maalintii saddexaad ee soo dhexgalkaan. Iskudayada kale ee lagu wargelinayo degenayaasha ujeedooyinka iyo shuruudaha xiritaankan sidoo kale dib baa loo dhigay ama ma jirin.

23. DHHS may awoodin inay soo saarto wax diiwaan ah oo muujinaya xanibaada degenayaasha 33 Alfred Street in si rasmi ah dib loogu eego maalin walba, jebin cad oo ah qaybta 200(6) ee Xeerka Fiyoobaanta iyo Caafimaadka Dadweynaha.

24. Macluumaadka loo qaybiyey degenayaasha sidoo kale ma tilmaamin awooda ay cabasho kaga sameyn karaan wax ku saabsan xiritaanka sida waafaqsan qaybta 185(1) ee Xeerka Fiyoobaanta iyo Caafimaadka Dadweynaha.

Hawo cusub iyo jimisiga bannaanka

25. Degenayaasha 33 Alfred Street lama siinin helitaanka jimicsi bannaanka ah ilaa iyo toddobaadkii labaad ee xiritaankan. Kordhinta khataraha caafimaad iyo fiyoobaan inta lagu jiray xiligan.

26. Dadka ka qaybgeliya tijaabada barnaamijka hawada cusub iyo jimicsiga 11 Luulyo 2020 waxaa la socday saraakiisha Boliiska Victoria ilaa iyo goob bannaanka ah oo lagu xiray derbi ku meel gaar ah. Waa muuqatay tani inay ahayd ihaano iyo meel ka dhac aadanimo.

27. Xanibaadaha kale ee la xiriira barnaamijka hawada cusub iyo jimicsiyada, oo ay ku jiraan waxa laga doonaya ee ah degenayaasha waa in lala socdaa dhismaha dhexdiisa oo ay dusha ka kormeeraan shaqaalaha caafimaadku, oo ay la socoto tallada caafimaadka dadweynaha oo aan ahayn waxaan macquul ahayn ee xaaladahaan.

28. Weli soo rogida barnaamijka jimicsiga iyo hawada cusub bilow ahaan wuxuu ahaa mid aan joogta ahayn iyadoo tilmaamaha caafimaadka dadweynuhu ay jiraan intii lagu jiray wejiga labaad ee xiritaanka. Kuwan iyo xanibaadyo kale oo la saaray degenayaasha inta lagu jiray xilligan uma muuqaan inay waafaqsan yihiin Xeerka Fiyoobaanta iyo Caafimaad Dadweynaha.

Hirgelinta

29. Ku lug yeelashada tirooyin aad u badan oo ah saraakiisha Boliiska Victoria oo lebisan si ay u dhaqan geliyaan xiritaanka waxay ku sharxeen degenayaasha , u doodayaasha iyo qaar ka mid ah shaqaalha caafimaadka labadaba waxaan loo baahneyn iyo iyadoo uusan ahayn waxaan tixgelin lahayn waxay soo mareen dadka badanoo ku nool 33 Alfred Street.

30. Dhinacan xiritaanka ma ahayn arin u muuqatay cinwaan qiimo u leh wada hadalka hay'ayadaha ama dooda, kumana ay saleysneyn tallo toos ah oo ka timid Ku xigeenka CHO. Guud ahaan, DHHS hay'ada masuulka ka ah ahaan hawlgalka iyo mulkiilaha bulshada waxay u muuqataa in aanay siinin tixgelin ku filan sidii hawlgelinta boliis badan loo qaadan doono oo ay u arki doonaan degenayaashu.

Fiyoobaanta iyo caafimaadka

31. TBaaritaanku guud ahaan wuu ku qancay nidaamka ku haboon ee loo dejiyey degenayaasha 33 Alfred Street si ay u helaan daryeel caafimaad inta lagu jiray xiritaanka, oo ay ku jirto daaweynta degdega ah meeshii ay lagama maarmaan noqoto.

32. Weli waxaa jiray dhibaatooyin waaweyn oo ah xagga siinta daawada iyo alaabada kale ee caafimaad degenayaasha.

33. Baaritaanku wuxuu ogaaday dhowr kiis oo fulintoodu ahayd codsiyo degdega ah oo daawo ayaa la dib loo dhigay ama ay dayacday hay'ada maareynaysay xiritaanka. Degenayaasha xaaladaha qaarkood waxaa lagu khasbay inay isku haleeyaan iskaa wax u qabsiga bulshada ama qoyska inay u soo qaadan u keenaan alaabta muhiimka ah.

34. Xalinta codsiyada alaabta daawada waxay ahaan lahayd faa'iido haddii uu jiro nidaam maamuul kiis oo dhexdhexaad ah iyo xiriirin ballaaran iyo korjoogtaynta DHHS.

35. Mid aad u qaabeysan, oo leh waajihid dhan oo lagula soconayo samafalka degenaha ayaa sidoo kale hoos u dhigi lahayd khataraha fiyoobaanta iyo caafimaadka la xiriira xiritaanka.

Kala duwanaanta luuqadeed iyo dhaqameed

36. Go'aanka ah in la saaro xiritaanka lama wargelin la tashiga hogaamiyayaasha bulshada dhaqamada badan.

37. La tashiga DHHS ee bulshooyinka dhaqamada badan ka dib markii uu bilowday xiritaanku bilow ahaan wuxuu ahaa mid falcelin ah oo aan dabeecad ah aan ahayn mid iskaashi leh laakiin wakhti ka dib wuu hagaagay.

38. Si kastaba ha ahaatee waxaa jiray dib u dhac weyn oo ah diyaarinta iyo qaybinta qoraalada ku saabsan xiritaanka oo ah luuqadaha bulshada. Dareenka ugu weyn, qoraalada la turjumay ee sharxaya ujeedooyinka iyo shuruuradaha xiritaanka looma qaybin ilaa maalintii shanaad iyo lixaad ee faragelinta.

39. Waxaa sidoo kale jiray maqnaansho aan la aqbali karin oo ahayd turjubaano aqoon leh Flemington iyo North Melbourne guryaha dadweynaha intii lagu jiray fiidkii ugu horeeyey ee xaalada xiritaanka ee ugu daran, iyadoo ay degenayaasha qaarkood isku haleynayeen caawimaada deriska iyo kuwa u dooda bulshada si ay u fahmaan waxa dhacaya.

La jaanqaadida xuquuqda bani'aadamka

40. Iyadoo xirida degenayaasha 33 Alfred Street si ku meelgaar ah laga yaabo inay ahayd qorshe ku haboon si loo xakameeyo cudurka ka dilaacay dhismaha ee COVID-19, u saarida xanibaadaha si dhakhsa ah 4-tii Luulyo 2020, iyadoo uusan jirin u diyaargarow dheeraad ah ama tallo caafimaad oo khaas ah oo ku talineysa talaabadaan, mana ahayn macquul ahaan mid lagama maarmaan ah umana muuqato mid la socon karta xuquuqda dhaqanka bani'aadanimo marka laga xanibo xuquuqda.

41. Xaqiiqdii, kuwo badan oo ka mid ah dhibaatooyinka la xiriirta xiritaanka waxay u muuqatay mid loo tiirinayo degdegii soo dhexgalka.

42. Baaritaanku sidoo kale kuma qanacsaneyn tixgelinta ku haboon ee la siiyey xuquuqda bani'aadanimo kuwaas ay saameysay xiritaanka markii xanibaada la soo saaray, iyadoo la ogsoon yahay in Ku xigeenka CHO la siiyey wax ka yar 15 daqiiqo inuu kaga fekero arintan.

43. Sidoo kale waxay ahayd wax cad in da'daal ka sii badan ay ahayd in la sameeyo si laysu waafajiyo dhinacyada sida soo dhexgalka loo dhaqangelinayo ee loo qaadanayo ujeedooyinkiisa caafimaad ee dadweynaha guud ahaan. Xaalado badan, saluuga degenayaasha ee ku saabsan xiritaanka dhammaan wuxuu ahaa mid la fahmi karo.

44. Ugu dambeyntii, waxaa jiray feker guud, oo ay sheegeen kuwo badan o ka mid ah deganayaasha iyo saraakiisha sare ee DHHS ee la wadaagay waxay arkeen baaritaanka, ee baahida in dib loo soo celiyo kalsoonida oo xiritaanka la socota.

Feker

Ombudsman wuxuu qaatay fikradahaan soo socda sida waafaqsan qaybta 23(1)(a) *Xeerka Ombudsman ka ee 1973* (Vic):

1. Xiritaanka dadka 33 Alfred Street 4-tii Luulyo 2020, iyadoo aan lahayn wax baaritaan dheeraad ah, waxay u muuqataa wax sharciga ka soo horjeeda, sababtoo ah waxay ahayd:
   - midaan la socon kareyn xuquuqda bani'aadamka ee *Heshiiska Xeerka 2006 ee Masuuliyada iyo Xuquuqda Bani'aadamka* (Vic)
   - kama dhalan tixgelin rasmi ah oo ah xuquuqda bani'aadamka ee khuseysa.

2. Xiritaanka dadka 33 Alfred Street ee la socotay ka qaadista *Tilmaamaha Xiritaanka (33 Alfred Street)* waxay ahayd mid aan la jaanqaadi Karin xuquuqda xoriyada waxayna u muuqataa wax ka soo horjeeda *Heshiiska Xeerka 2006 ee Masuuliyada iyo Xuquuqda Bani'aadamka* (Vic).

3. Ku guuldareysiga DHHS si loo hubiyo xiritaanka degenayaasha 33 Alfred Street waxaa dib loo eegay ugu yaraan hal mar maalintii waxay u muuqataa mid ka soo horjeeda *Xeerka 2008 ee Fiyoobaanta iyo Caafimaadka* (Vic).

4. Waxa laga rabo ee in dadka 33 Alred Street inay ku jimicsadaan goob ay ku wareegsan yihiin derbi ku meelgaar ah ee fiidka 11 Luulyo 2020 wuxuu ahaa mid hoos u dhigid ah oo aan bani'aadam ahayn, waxayna u muuqataa wax ka soo horjeeda qaybta 38(1) ee *Heshiiska Xeerka 2006 ee Masuuliyada iyo Xuquuqda Bani'aadamka* (Vic)

Intaas ka sokow, iyada oo la sii socota qaybta 23(1)(g) ee Xeerka Ombudman ka:

5. DHHS acted in a manner that was wrong, in:

   (a) ay ku guuldareysatay inay siiso dadka 33 Alfred Street macluumaad wakhtiyeysan oo ku saabsan xiritaankooda, oo ay ku jiraan luuqadaha bulshada

   (b) waxay ku guuldareysteen inay wargeliso dadka 33 Alfred Street awoodooda ay kaga caban karaan sida loola dhaqmay

   (c) waxay ku guuldareysteen inay siiyaan dadka 33 Alfred Street helitaanka hawo cusub iyo jimicsiga bannaanka intii u dhaxeysay 4 Luulyo iyo fiidkii 11 ka Luulyo 2020

   (d) waxay ku guuldareysteen inay qaadaan talaabooyin ku haboon oo lagu hubinayo in dadka 33 Alfred Street la siiyey helitaan ka macquulka ah ee daawada markii la xiray.

Tallo soo jeedino

Iyadoo waxyaalo kalena ay ku jiraan, Ombudsman wuxuu ku taliyey in Dawlada Victoria:

- inay cudurdaar ka bixiso dhibkii ama welwelkii uu sababay xiritaankii degdega ahaa
- Waa inay wax ka bedeshaa *Xeerka 2008 ee Fiyoobaanta iyo Caafimaadka Dadweynaha* (Vic) si ay ugu daraan ilaalinta weyn ee ku hareeraysan isticmaalka awoodaha xiritaanka ee xaalada degdega ah.

Ombudsman ku sidoo kale wuxuu ku taliyey in DHHS:

- ay hubiso qorshayaasha ka jawaabida iyo diyaargarowga,ka hortaga dilaaca cudurka COVID-19 oo ku haboon inuu jiro dhammaan guryaha kale ee xasaasiga ah ee ay maamusho Dawlada Victoria
- inay la tashato Golaha Dhaqamada badan ee Victoria oo ay la shaqeyso hogaanada bulshada si ay u xoojiso kalsoonida iyo hawlgelinta.
- ay ka fekertaa qorshayaasha kale si loo hagaajiyo xiriirka u dhaxeeya DHHS iyo degenayaasha guryaha dadweynaha ee Flemington iyo North Melbourne, sida sameynta jamciyado wakiil ka ah kireystaha mid ama wax ka badan.

Warbixinta baaritaanka buuxa ee Ombudsman ee Ingiriiska ah waxaa laga heli karaa: www.ombudsman.vic.gov.au

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan warbixintan waad nala soo xiriiri kartaa. Wac (03) 9613 6222 (inta u dhaxeysa 10 subaxnimo-4 galabnimo Isniinta – Jimcaha), ama haddii aad u baahan tahay turjubaan wac 131 450 (inta u dhaxeysa 10 subaxnimo-4 galabnimo Isniinta – Jimcaha).